



UNUGGA XIRIIRKA KOMUYUUNATIGA

QEYBTA BOOLISKA ee COLUMBUS • XAFIISKA JAWAABAHA
ISTARAATEJIGA AH

Weeraha Caadiga ah ee Maxkamadda Dembiyada:

Hortag Maxkamadeed: Waa in hortagga koowaad ee eedeysanaha si rasmi ah loogu sheego dembiyada lagu soo eedeeyey. Hortagga koowaad ee maxkamaddu waxa kale uu yahay halka lagu bixiyo furashada (bond) koowaad ama wax lagaga beddelo oo laga yaabo in lagu bixiyo Amarrada Illaalinta (Protection Orders).

Furashada: Xiritaanka ka bacdi ayaa xaakinku go'aamin doonaa caddadka furashada (bond) si uu u hubiyo in eedeysanuhu maxkamadda yimaaddo. Waxa jira 3 nooc oo furasho ah:

- Furasho Hortag Aan Damiin Laheyn - oo eedeydeysanaha u oggolaata inuu jeelka kaga baxo saxeexiisa oo qura.
- Furasho Hortag ah - eedeysanuhu waa inuu maxkamadda siyyaa boqolkiiiba 10% lacagta furashada iyo fiiga maxkamadda ka hor inta aan la sii deynin. (Tusaale ahaan, furasho hortag oo dhan \$1500 doolar waxa qofka laga rabaa inuu bixiyo ugu yaraan \$170 doolar - oo ay ku jirto \$20 doolar oo ah fiiga maxkamadda - si uu jeelka uga baxo.)
- Furashada Kaashka ah - eedeysanuhu wuxuu ku qasban yahay in kaash ahaan u bixiyo dhammaan lacagta furashada ama uu kireysto dilaalka furashada "bondsman" (fiiga dilaalka furashada oo aan la soo celineynin waa boqolkiiiba 10% doolar waddarta lacagta furashada).

Dacwad: Waa weer rasmi ah oo lagu dhaartay oo dembiga ah oo bixisa sharciga lagu soo xirayo eedeysanaha.

Sii wadis: Waa dib u dhigista dhageysiga maxkamadda ee maalin kale. (sida "Kiisku wuu sii socon doonaa").

Dacwadqaadis maxkamadeed: Waa dacwad qaadis ka dhacda xaakinka hortiisa, ee aan ka dhicin xeerbeegtida (jury) hortooda.

Eedeysane: Waa qofka dacwadda lagu soo oogay.

Looyarka ama qareenka eedeysanaha: waa looyarka uu qabsado ama loo magacaabo inuu wakiil ka noqdo eedeysanaha (oo noqon kara mid dawladeed ama mid gaar ah).

Caddeyn: Waa wax kasta oo la soo hordhigo maxkamad si loogu taageero kiis. Waxa tan ka mid noqon kara weerta dhibanaha, eedeysanaha ama marqaati kale, dhokumanti, sawirro, sheeyaal dhar ah, hub, iyo booliska ama rikoorka caafimaadka.

Xeerbeegtida Weyn: Waa koox dad ah oo dhageysta kiisaska loo soo qaddimo xukun dembi ah. Waxyaalaha halkaas ka dhacaa waa sir ka reeban dadweynaha.

Heshiiska Qirashada: Waa marka uu eedeeysnuhu oggolaado inuu dembiga qirto, oo inta badan ah dembi ka yar kii hore, si uu uga badbaado xukun.

Dhageysi Hore: Waa dhageysiga koowaad ee lagu oggaanayo haddii ay jiraan caddeymo ku filan in la sii wado eedeeymaha dembiga ah.

Sabab Macquul ah: Waa muujin ka horeysa dacwad qaadista inay jiraan caddeymo ku filan oo ku lid ah eedeeysanaha si loo sii wado kiiska.

Kantaroolka Sii Deynta Tijaabada ah/Komuyuunatiga: Waa xujo la socota xaringga oo eedeeysanaha laga rabo inuu warbixin siiyo sarkaalka sii deynta tijaabada ah, iyo inuu raaco amarrada uu faray xaakinku, (tusaale ahaan: inuu ka qeybgalo la-talinta, inuu sii haysto shaqadiisa, inuu sameeyo baaris daroogo iyo khamri) si aan jeelka ama xabsiga dib loogu celinin.

Dacwad-oogaha: Waa qareenka wakiilka ka ah Dawladda Ohio xagga kiiska dembiga ah.

Baarista Ka Hor Xukunka (Pre-Sentence Investigation) (P.S.I.): Waa warbixin ay diyaariso Waaxda Sii Deynta Tijaabada ah si xaakinka loo siiyo macluumaadka uu u baahan yahay inuu xukun ku saaro eedeeysanaha.

Kalkaaliiso Baarta Weerarka Galmada (SANE): Kalkaaliyayaasha sida gaarka ah loogu tababaro arrimaha kalkaaliyayaasha baarayaasha ah iyo uruurinta caddeymaha ee kiisashka weerarka galmada.

Wicid Maxkamadeed: Waa amar maxkamadeed oo ah in eedeeysanahu isa soo hortaago maxkamad.

Qoraalka Shaanbadeysan ee Wicidda Maxkamadda: Waa qoraalka amarka maxkamadda ee ah in dhibbanayaasha iyo marqaatiyaashu hor yimaaddaan maxkamadda.

Dacwadqaadis: Waa meesha uu eedeeysanahu geeysto kiiskiisa in lagu dhageysto xeerbeegti ama xaakin hortooda/hortiisa.

Macluumaadka Dhibbanaha & Nidaamka Oggeysiinta(VINE): Waa adeeg telefoon otomaatik ah oo bilaash ah oo dhibbanayaasha dembiyada u oggolaan karo inay helaan macluumaadka dembiilaha 24 saac maalin kasta. Dhibbanayaashu waxay kaloo telefoonkooda si qarsoodi ah ka diiwaangelin karaan hay'adda VINE in loo soo sheego wixii is-beddel ah ee ku yimaadda xaalladda dembiilaha.(1-800-770-0192).

Waaran: Waa weer loo isticmaalo amar uu bixiyo xaakin marka eedeeysanahu ka baaqdo inuu horyimaaddo maxkamadda.